

SOMALI

Ka hortagga Jabsiga



seattle.gov/crime-prevention

Ka hortagga Jabsiga

Sidee looga Hortagi Karaa

- Naftaada weydii, “Haddii guriga iga xirmo, sidee baan aqalkeyga ugu noqon karaa?” Adkee dariishad ama albaab kasta oo nugul.
- Qoful adag ku rakib qeybta banaanka ee albaabada kuna adkee 3 ilaa 4 inji masaamiir iskuruu ah halka qufulku galo.
- Isku day inaadan uga tagin alaabaha qiimaha leh meel laga arki karo, ama ka muuqan dariishadda ama albaabada.
- Adkee oo xir dhamaan dariishadaha iyo albaabada, xittaa haddii aad guriga joogto.
- Ha uga tagin fure dheeri ah bannaanka.
- Gasho hab ama system ammaanka ah, haddii ay suurto gal tahay.
- Hoos u gaabi dhir kasta oo aragtida kaa xireysa meelaha laga soo galo.
- Ku xaree ama ku xir jaran-jarooyinka iyo qalabka bannaanka.
- Ka saar dhagxaanta dabacsan iyo mutuneelayaasha ku dhow muraayadaha jilicsan.
- Ku biir Ilaalada Xaafadda oo baro dadka kula dariska ah.

Sidee lagu soo wargelin karaa

- Haddii fal dambiyeed socdo, wac 9-1-1.
- Haddii aad ku soo noqoto guriga ama ganacsigaaga ood aaminsan tahay in la jabsaday, wac 9-1-1 oo sug booliska inta aad gudaha gelin.
- Isku day inaadan isku taaban wax kasta oo marqaati noqon kara.

Fariinta Furaha ah:

La xiriir Xiriiriyaha ka Hortagga Dambyada si loogu ballamo qiimeyn amniga oo lacag la'aan ah.



**SPD Crime
Prevention**

9/2021 V.1